# Dulmarka aragtiyada isticmaalaha ee ku darista Dhijitaalka — Qaxootigii hore iyo soo galootiga u ah Ingiriiska luuqad labaad




Te Tari Taiwhenua
Internal Affairs

Te Kāwanatanga o Aotearoa
New Zealand Government

# 1. Hordhaca

Ku darista dhijitaalka waxaa loo qeexi karaa sida dhammaadka gobolka meeshaas oo qof walba leeyahay fursado simman si ay uga qeybqaataan bulshada iyada oo la adeegsanayo teknoolijiyada dhijitaalka (Kooxda Cilmi-baarista ee Ku darista Dhijitaalka, 2017).

Wargelinta qibrada isticmaalaha (UX) ee loogu talagalay qaxootigii hore iyo soo galootiga la takooro waxay qeyb ka tahay taxanaha wargelinta aragtiyada isticmaalaha ku darista dhijitaalka ee ay wakiishaan Te Tari Taiwhenua Waaxda Arrimaha Gudaha (DIA). Ujeedada taxanaha waa fahamka waaya aragnimada noolaa ee kooxyada inta badan ah dhijitaal ahaan looga reebay.

Qaxootiiyada hore iyo soo galootiga la takooro ayaa sidoo kale ka mid ah kooxyada diirada ee ka helay taageero yar hindisooyinka dowlada marka la barbardhigo dadka kale sida lagu soo sheegay wargelinta dowlada ee tirikoobka diirada.

Akhri qeybta 2 wargelinta: Diiwaanka badeecada ku darista dhijitaalka: Ku daristee dhijitaalka ayaa u eg dowladda oo dhan.

Cilmi baarista waxay ku dajisaa:

- Aqoonso caqabadaha, caqabadaha iyo baraha xanuunka ee qaxootiyada hore iyo soo galootiga la takooro' safarka ku darista dhijitaalka ah
- faham sida dhijitaal ahaan loogu daray kooxdaan qaabka ku darista dhijitaalka.

Cilmi baarista wuxuu tixgelinayaa waaya aragnimada dejinta kooxdaan ee Aotearoa New Zealand ee muddooyinka waqtigaan — 3 bilood ee ugu horeyso iyo 3 sannooyinka koowaad.

Cilmi baarista waxaa la sameeyay laga bilaabo Abriil illaa Juun 2021 ee 6 goobaha New Zealand oo dhan. Guud ahaan, waxaa jiray 41 ka qeybqaatayaal ee matalayo 20 qowmiyadaha. Wareysiyada qotoda dheer iyo ka qeybqaatayaasha waxay ahaayeen qaabka qof ku qof iyo waji ku waji. Waxaa jiray taageero ka imaanayay turjubaanada qof ahaanta ama taleefonka markii loo baahanyahay.

## Qirashada

DIA waxay u fidineysaa mahadcelintooda ugu diiran qof walba oo la wadaagay sheekooyinkooda oo ka qeybqaatay mashruucaan cilmi baarista UX. Kooxda ku darista Dhijitaalka ayaa sidoo kale jeclaan lahaa inay qirtaan Wasaarada Bulshooyinka Qowmiyada oo la shaqeynta cilmi baaraha si looga qeybgeliyo bulshooyinka oo ay ku jiraan hay'adaha deegaanka iyo aan dowliga aheyn (NGOs) si loo diyaariyo wareysiyada oo loo siiyo hagid iyo jawaab celin.

DIA waxay jeclaan laheyd inay ogaato in warbixinta iyo natiijooyinka ku jiro wargelintaan waxay muujineysaa aragtiyada shaqsiyaadka la wareystay iyo kooxyada kala duwan ee la matalayay.

## Soo sheeg macluumaad

Loo diyaariyay Te Tari Taiwhenua Waaxda Arimaha Gudaha iyo Wasaarada Bulshooyinka Qowmiyada.

Waxaa diyaariyay Jas Hua.

Taariikhda: 30 Nofeembar 2021

### Xigashada

Hua, J. (2021, Nofember). ‘Dulmarka aragtiyada isticmaalaha ee ku darista Dhijitaalka — Qaxootigii hore iyo soo galootiga u ah Ingiriiska luuqad labaad’. Waxaa laga soo turjumay warbixinta Ingriis ah ‘Summary of Digital inclusion user insights — Former refugees and migrants with English as a second language.’ Department of Internal Affairs. https://www.digital.govt.nz/dmsdocument/195~summary-of-digital-inclusion-user-insights-former-refugees-and-migrants-with-english-as-a-second-language/html



# 2. Natiijooyinka muhiimka ah

Qeybtaan waxay soo koobeysaa natiijooyinka muhiimka ah ee dib u eegista suugaanta iyo cilmi baarista la sameeyay, iyo xaqiiqaha kale ee saameynayo ku darista dhijitaalka oo qaxootiga hore iyo soo galootiga la takooro.

Helitaanka iyo xirfadaha waa 2 caqabadaha ugu weyn ee ku darista dhijitaalka oo qaxootiyada hore iyo soo galootiga la takooro.

Xaqiiqaha kale ee ku sameynayo carqalado ku darista dhijitaalka ee kooxdaan waa:

- aqoonto luuqada Ingiriiska hoose
- caqabadaha dhaqanka
- heerka bulshada-dhaqaalaha hooseeyo.

## 2.1. Dulmarka dib u eegida suugaanta

Shan goobta xogta ah ayaa laga raadiyay suugaanta jirtay ee ku darista dhijitaalka oo qaxootiga hore iyo soogalootiga u ah Ingiriiska sida luuqada labaad (ESL) ee gudaha New Zealand iyo wadamada kale ee ku haraareysan caalamka. Fiiltareynta koowaad ee dulmarka tusmada diiwaanka 36 la soo saaray. Laga bilaabo halkaas, diiwaan walba dib ayaa looga eegay in lagu go'aansado ku haboonaanta baaxada cilmi baarista.

Aragtiyada ayaa sidoo kale loo isticmaalah si ay u ogeysiiso qorshaha cilmi baarista.

### Kala duwanaanshaha qeexitaanada iyo waaya aragnimada u dhaxeyso 'qaxootiga' iyo 'soo galootiga'

Waxaa jiro farqiga sharciga oo cad ee u dhaxeeyo qaxootiga iyo soo galootiga, taas oo lagu qirtay Gollaha Guud ee Qaramada Midoobay ee Ku dhawaaqida New York ee Qaxootiga iyo Soo galootiga (Gollaha Guud ee UN, 2016) iyo Hay'ada Qaxootiga Qaramada Madoobay (UNHCR).

Qaxootiga iyo soo galootiga ayaa maro waaya aragnimo kala duwan markii ay yimaadaan wadan cusub. Gudaha New Zealand, kooxyadaan waxay helaan taageerada dejin kala duwan ee ay bixiyeen Socdaalka New Zealand (INZ) oo kaashanayo wakaaladaha kale ee dowlada iyo bixiyayaasha xisbiga sadexaad.

### Isku ekaanshaha soo jeedinta u dhaxeeyo 'qaxootiga' iyo 'soo galootiga la takooray'

Meeshaas waxaa ka jiro koox soo galooti ah oo wajaho caqabado la mid ah kuwa ay wajahaan qaxootiga hore inta lagu jiro safarkooda dejinta. Kuwaan waxaa ku jiro caqabadaha bulshada, dhaqaalaha, dhaqanka iyo siyaasada. Kooxdaan waxaa lagu qeexay sida 'soo galooti la takooray' ee Belong Aotearoa iyo NGO-yada kale ee New Zealand. (Belong Aotearoa, UMMA Trust, RASNZ, NZ Red Cross, Asylum Seekers Support Trust, Aotearoa Resettled Community Coalition, Family Action, 2020).

Gabagabadii, waxaa jiro heer sare oo wax wadaagida u dhaxeeyo qaxootiyada hore iyo soo galootiga la takooray oo u baahan helitaanka adeegyada taageerada oo dejintooda. Waxaa jiro wax wadaagid yar ee u dhaxeeyo qaxootiyada hore iyo kooxyada kale ee soo galootiga, sida soo galootiga xirfadeysan. Cilmi baaristaan, qaxootigii hore iyo soo galootiga la takooray ayaa ah diirada guud.

### Mowduucyada ugu muhiimsan ee laga aqoonsaday dib u eegida suugaanta

- Waxaa jiro caqabado lagu adeegsanayo warbixinta onleenka ee illaha rasmiga ah oo qaxootiyada dhawaan soo galay iyo soo galootiga.
- Tejnooliyada dhijitaalka waxay u suurtogeliyaan qaxootiga iyo socdaalka inay buuxiyaan mid ka mid ah baahiyadooda ugu muhiimsan: isgaarsiinta la goyn karo ee ay la jirto shabakadahooda bulshada. Si kastaba, caqabadaha ayaa weli jiro ee isticmaalida aaladaha dhijitaalka ee faa'idadooda.
- Dhijitaal ahaan loogu daray dadka inay gaaraan ku daris iyo fayo qabka bulshada.

Lagu aqoonsaday dib u eegida suugaanta, mowduucyadaan3 muhiimka ah waxay ku caawiyaan i nay qeyb ahaan uga jawaabto su'aalaha ku jiro ajendaha cilmi baarista ku darista dhijitaalka sidoo kale sida ogeysiinta baaxada cilmi baaristaan.

Caqabadaha ku darista dhijitaalka ah oo qaxootigii hore iyo soo galootiga waxay ku dhafantahay xaqiiqaha kale oo ay ku jiraan caqabadaha bulshada, dhaqanka, dhaqaalaha iyo siyaasada ee soo baxa markii la xalinayo wadankooda martigelinta cusub.

Waa malaawaal in kobcinta qeybaha ku darista dhijitaalka — dhiirogelinta, gelitaanka, xirfadaha iyo aaminaada (MAST) — waxay sare u qaadeysaa ku darista dhijitaalka kooxdaan iyo sidaas darteed xaqiiqaha la xiriiro safarkooda dagida.

## 2.2. Dulmarka natiijooyinka cilmi baarista

Natiijooyinka cilmi baarista waxaa laga falanqeeyay si ku aadan qaabdhismeedka MAST, taas oo ay ku jirto qeybaha 4 xubno isku tiirsan: dhiirogelinta, helitaan, xirfado iyo aaminaad.

### Dhiirogelinta

Qaar ka mid ah qaxootigii hore iyo soo galootiga laga tiro badanyahay ma lahan wax waaya aragnimo hore ee aaladaha dhijitaalka, intarneet-ka ama adeegyada onleenka ka hor imaanshaha NZ. Tani waxay abuurtaa meelaha banaan ee cilmigooda ee waxa suurtogalka ah si loo gaaro tejnooliyada farsamada.

Kala sareynta baahiyada waxay qaadaa mudnaanta, iyo helitaanka maskaxeed ee lagu baranayo waa gabaabsi. Kuwa fahamsan faa'iidooyinka bulshada iyo dhaqaalaha ee tejnooliyada dhijitaalka, faa'idooyinkaan lama ogaado sababtoo ah la'aanta helitaanka ee aaladaha iyo xirfadaha quseeyo. Ku xirinka qoysaska iyo saaxibada dibada ayaa ah dhiirogelinta ugu weyn iyo isticmaalka joogtada ah ee mobeelada kooxdaan.

> “Waxay dhabtii igu qaadataa muddo aad u dheer, xittaa inkastoo sida saaxibada ama isku fasalka meesha aan u adeegsaday inaan wax ku barto, horaan ayay u haysteen mobeelada casriga oo waxay bilaabeen inay soo baxaan. Isla markiib ma heysanin telefoonka casriga. Laakin hadan markale, ma ogaan in midaas ay aheyd caqabad, sababtoo ah ma ogeyn mobeelkee casriga ah ee sameyn lahaa. Waxaana aad ula qabsaday qaab nololeedkeyga ilaa uu telefoonkeygu jabo. Iyo kadib waa inaan helaa mid cusub. Iyo waxaa noo dambeysay inaan u helo mobeel casri ah hooyo iyo nafsadeyda. Waxay igu qaadatay 3 sanno.”
>
> — Ka qeybqaataha cilmi baarista

## Helitaanka

Qarashka ayaa ah caqabadaha ugu weyn eekooxdaan ay ku galaan aalado balaaran sida kumbuyuutarada, laabtoobyada, xogta mobeelka iyo qorshooyinka, iyo shabakada intarneetka aan xadidneyn. Khadka ee wifi-ga dadweynaha bilaashka ah ee is waafaqsan, ee xawaaro hooseeyo ama waqti ku saleysan, ama dhammaan kuwa kore.

Wixii helitaanka adeegyada dowlada, booqashada qof ahaanta ayaa weli loo arkaa sida qaab aad wax ku ool u ah ee lagu helo waxyaabo muhiim ah in lagu sameeyo iyo si loo xaliyo arimaha iyo su'aalaha.

Billooyinka 3 koowaad, ballamaha qof ahaanta ama wacitaanada taleefonka oo leh adeegyada fasiraada ayaa ah qaababka la doorbiday ee helitaanka adeega. Taageerada shabakadaha bulshada sida iskaa wax u qabsadayaasha, shaqaalaha dejinta, xubnaha qoyska ama xubnaha bulshada ayaa muhiim u ah kooxdaan si loo helo intarneet-ka, aaladaha iyo adeegyada muhiimka ah haddii uu onleen yahay aam offleen yahay.

Helitaanka isu adeega onleenka ah suurtogal ma ahan sabab la xiriirto xadeynta luuqada Ingiriiska, la'aanta illaha luuqadaha qowmiyada, xirfadaha dhijitaalka xadidan, iyo garasho la'aanta sida nidaamyada onleenka u shaqeeyo. Isbeddelkaan isma beddelayo inta badan oo 3 sanno ee koowaad ee degida NZ oo inta badan kooxdaan.

Kuwa rabaa inay adeegsadaan adeega shaqsiga onleenka, waqti ayay isticmaashaa sababtoo ah waxay u baahanyihiin inay isticmaalaan aaladaha fasiraada onleenka si ay uga caawiso fahamka tusmada iyo codsiyada. Iyada oo aan laga eegin dadaaladaas, caawin ayaa weli loogu baahanyahay su'aalaha, sharuudaha iyo erayada adag.

> “Waxba kama ogeyn wax ku saabsan New Zealand ka hor inta aanan imaan. Caadi ahaan, ka hor inta aanan imaanin New Zealand, waxaa nala siiyay waxyar oo warbixin ah ee ku saabsan New Zealand. Markii aan si daacad ah u hadalno, ma garaneyno meesha ay ku taalo New Zealand. Markii aan imid halkaan wakaalada dib u dajinta, waxay isiiyeen[a] shaqaalaha taageerada iskaa wax u qabsiga ah, si wanaagsan ayay iigu sameysay wax walba, sida loo aado dukaameysiga, sida loo adeegsado kaarka bangigaaga, sida loo aado Shaqada iyo Daqliga, ama sida loo aado dugsiga, sida loo [raaco] baska ama wax walba waa waxa shaqaalahaan taageeraa iga caawiyo oo igu jaheeyo iguna hago iguna taageero si aan u dago bulsho cusub.”
>
> — Ka qeybqaataha cilmi baarista

## Xirfadaha

Waxaa jiro cadeyn ah in tababarka xirfadaha dhijitaalka ee xarumaha luuqada jinsiga nidaamka lagu helayo madaxbanaanida xirfadaha dhijitaalka ee aqoonta luuqada Ingiriiska. Si kastaba, waxaa jiro baahiyo si cad looga go'ayo heerarka xirfadaha dhijitaalka, si markaas tababarka wax ku ool noqdo. Bulshooyinka la aaminsanyahay ayaa si wanaagsan loogu qaabeeyay sida dhexdhaxaadinta lagu caawinayo wareejinta cilmiga, taageero siisid, iyo fududeynta tababarka xirfadaha dhijitaalka.

Aagaga 3 ugu sareeyo ee ugu muhiimsan xirfadaha dhijitaalka kooxdaan waa:

1. xirfadaha wareejinta onleenka
2. kaliya badqabka iyo xirfadaha amniga
3. xirfadaha lagu qaabilayo maclumaadka onleenka iyo tusmada.

Xirfadaha 5 ugu sareeyo dhijitaalka gaarka ah oo ay kooxdaan rabaan inay hormariyaan waa:

1. ku keydinta maclumaadka onleenka iyo ka gelida tusmooyinkaas aalaado kala duwan
2. si joogta ah u cusbooneysiinta aaladaha si looga hortago fayrasyada iyo halisaha kale
3. u maareynta lacagtooda iyo wareejinada onleenka ah si illaalsan
4. ka gelida iyo isticmaalida adeegyada dadweynaha onleenka ah, tusaale ahaan, diiwaangelinta gaariga, MyMSD
5. bixinta alaabaha ama adeegyada onleenka ah.

La'aanta aqoonta luuqada Ingiriiska waa caqabad weyn oo lagu helayo xirfadaha dhijitaalka maadaama tababarka ugu badan lagu bixiyo af Ingiriiska.

> "Fasal badan ayaa muhiim ugu ah dadka weyn sababtoo ah waxaan ula jeedaa dadka weyn, xittaa inkastoo aan haysano kumbuyuutar, inta badan dadka ma [furi] karaan, ma garanayo sida loo isticmaalo, marka koorsada kumbuyuutar noocaan ah aad ayay muhiim ugu tahay. Laakin dhibaatada xigta waa miyay koorsadaan kuugu siisay cashar Ingiriis ahaan. Waxaa jiro dhibaato weyn. Marka haddii aan haysano qof aan ku bari karno luuqadeena, midaan aad ayaa looga mahadcelinayaa. Sababtoo ah hadda, teknooljiyada meel walba ayay taalaa. Marka bartaas, qof walba wuxuu u baahanyahay inuu fahmo ugu yaraan aasaaska koorsada. Iyo inaga oo dhaheyno, dowladda ama hay'ado badan waxay bixisaa koorsooyinkaan bilaashka ah, laakin weli way nagu adagtahay inaga. Sababtoo ah ma garaneyno, dadka badanaa ma garanayaan af Ingiriis. Erayada kumbuyuutarka aad ayay ugu adagyihiin in la fahmo."
>
> — Ka qeybqaatataha cilmi baarista

Kalsoonida shaqsiga hooseyso iyo mudnaanta buuxinta baahiyada noolaanshaha aasaaska waxay saameysaa ka qeybgalka socdo ee fasalada tababarka.

Dumarka ku jiro kooxdaan waxay ku jiraan halis weyn ee ka reebida dhijitaalka sabab la xiriirto heerarka hooseeyo ee xirfadaha dhijitaalka iyo la'aanta fursadaha iyo taageerada looga qeybqaadanayo fasalada tababarka gaar ahaan sababtoo ah waajibaadyada daryeelida dadka gudaha, waxaa xiggo dhaawactada iyo jirooyinka.

## Aaminaada

Cabsida maclumaadka shaqsiga — oo ay ku jiraan kaarka bangiga iyo sharaxaadaha koontada bangiga — la dabagalay, xanibmay oo loo ururiyey ujeeddooyin aan xiriir la lahayn ayaa ah illaha ugu weyn ee aaminaad darada. Midaan waxay abuurtaa xadeynada lagu sameynayo howlaha onleenka sida adeegashada onleenka sida adeegashada onleenka, lacag bixintada bangiga onleenka iyo lacag bixinta onleenka oo adeegyada ugu muhiimsan.

> "Sheyga ugu walaaca badan iyo sheyga aan la aamini karin ee aan jecleen ayaa ah xatooyada aqoonsiga oo waad ogtahay, wixii macluumaad ah, ka taxadar sababtoo ah ma garaneysid haddii dadkaan ay qaadanayaan oo aadan hubin haddii aad sameysay sheyga saxda ah markii aad buuxisid foomkaas."
>
> — Ka qeybqaatataha cilmi baarista

Waaya aragnimada hore- ama waaya aragnimada gacanta labaad ee dambiyada intarneetka sida qiyaanooyinka onleenka, qiyaanada iyo jabsiga ayaa sidoo kale ka hooseeyo aaminaada ku jirto caalamka dhijitaalka ah.

Shabakooyinka bulshada ayaa ugu aaminaad leh, waxaa xigay websaydyada dowlada, kanaalada iyo summadaha caanka ah ee bangiyada, isgaarsiinada iyo warbaahinta wararka. Saameynta bulshada ayaa sidoo kale ah xaqiiq muhiim ah oo fududeyneyso la qabsiga teknooliyada dhijitaalka.

## 2.3. Xaqiiqaha kale ee sameeyo ku darista kooxdaan dhijitaalka

Marka laga reebo 4 qeybaha ku jiro qaabdhismeedka ku darista dhijitaalka, waxaa jiro xaqiiqo kale ee saameeyo ku darista dhijitaalka ee kooxdaan.

### La'aanta aqoonta luuqada Ingiriiska iyo wacyigelinta helitaanka adeega

La'aanta aqoonta luuqada Ingiriiska iyo illaha luuqadaha qowmiyada ayaa ah caqabadaha muddada dheer ee ku darista dhijitaalka ee kooxdaan.

Midaan waxay uga sii dareysaa wacyigelin la'aanta ama fahamka sida waxyaabaha uga shaqeeyaan NZ, iyo warbixintee dowlada iy adeegyadee ayaa la heli karaa, gaar ahaan kuwa aan u qalmin inay maraan barnaamijyada dib u dajinta dowlada.

> "Waxaan ula jeedaa, marka la barbardhigo tejnooliyada la heli karo hadeer, wax walba aad ayay u adkaayeen. Laakin xiligaas, sababtoo ah gabi ahaanba lama soconin waxa adeegyada ugu muhiimsan yihiin, sababtoo ah gabi ahaanba lama socotid waxa aysan haynin waqtigaas, marka waa sida adiga oo ku sameeynayo waxa aad haysatid oo aadan xittaa dhihin 'oh tani way adag tahay', kaliya samee."
>
> — Ka qeybqaataha cilmi baarista

### Caqabadaha dhaqanka

Sifooyinka dhaqanka waxay u baahantahay in la tuixgeliyo markii la korinayo wacyigelinta ama gaarsiinta adeegyada dowladda, ama sameeynta labadaba — gaar ahaan haddii ay onleen tahay. Dhaqamada qaar u tixgeli inay ceeb ku tahay weydiinta su'aalo ama caawin. Dadka qaarkiis ma rabaan inay la kulmaan inay dhib ku yihiin dadka kale. Midaan waxay u hogaamisaa jawaab celin la'aan ee bixiyayaasha adeega, gaar ahaan markii adeegyada aanan si wanaagsan loogu gaarsiin onleenka ama offleenka — tusaale ahaan, taleefon ahaan ama xarunta adeega.

> "Sida weydiinta su'aalaha caawinta ama wax sidaas ah ... Sababtoo ah dhaqanka waa yara ceebyar in la weydiiyo: ma iga caawin kartaa? [Markii dib loo fiiriyo] waxaan u sameynayaa si ka duwan, waxaan weydiinayaa xittaa haddii aanan fahmin."
>
> — Ka qeybqaataha cilmi baarista

### Heerka dhaqaalaha-bulshada

Foomamka heerka dhaqaalaha-bulshada caqabad kale ku ah ku darista dhijitaalka kooxdaan, gaar ahaan helitaanka aaladaha dhijitaalka, xogta mobeelka iyo qorshooyinka, iyo intarneetka guriga oo aan xadidneyn. Midaan waxay saameysaa dhiirogelinta, qeybaha helitaanka iyo xirfadaha ee qaabdhismeedka MAST sababtoo ah waxay qaadataa waqti in sare loogu qaado xaaladaha bulshada-dhaqaalaha.

### Heerka waxbarashada

Heerka waxbarashada sare waxay u muuqataa inay la xiriirto heer sare oo ku darista dhijitaalka gaar ahaan qeybta xirfadaha. Midaan waxaa lagu dhowray qaxootigii hore ee ka raadsaday ama ka raadsanayo waxbarashada sareyso NZ iyo soogalootiga qaar ee leh shahaadooyinka waxbarashada.

## 2.4. Ku darista dhijitaalka iyo fayo qabka

### Helitaanka adeegyada bulshada

Ku darista dhijitaalka ayaa qeyb ahaan u saameyso helitaanka kooxdaan ee adeegyada bulshada ee muddada dheer, gaar ahaan iyo u dhaqaaqida isu adeegida onleenka dheeraad ah. Kooxdaan, kala duwanaanshaha helitaanka adeegyada bulshada iyo noocyaa helitaanka u dhaxeeyo wadankooda hore iyo NZ waa la miclisaday. Midaan waxaa usii dheer la'aanta helitaanka waaya aragnimada la soo dhaafay ee intarneetka iyo aaladaha dhijitaalka, iyo ku yar aqoonta luuqada Ingiriiska oo inta ugu badan qaxootigii hore iyo soo galootiga. Midaan waxay ka dhigtaa helitaanka adeegyada bulshada onleenka mid adag.


Bilahooda 3 koowaad ee NZ, taageerada iskaa wax u qabsiga, shaqaalaha dejinta, qoyska, saaxibada iyo xubnaha bulshada waa muhiimada lagu helayo adeegyada muhiimka ah. Noocyaa ladoorbiday ee helitaanka ayaa ah balamaha qof ahaanta iyo wacitaanada taleefonka. Isbadelkaan wuxuu ahaanayaa mid aan isbeddelayn sannadka 3 koowaad.

### Xiriirka bulshada iyo fayo qabka shaqsiga

Helitaanka mobeelada casriga ah, oo ay kaalmeyneyso isku xirka intarneet aan xasilooneyn ee NZ, sida wifi ee guriga, wuxuu abuuraa qaab dhaqaalo iyo is waafaqsan oo kooxdaan ay kula xiriirayaan qoysaskooda. Sidaas darteed, ku darista dhijitaalka waxay u suurtogelisaa kooxdaan joogteynta qoyska iyo xiriirada bulshada dibada ah oo haddii kale aan suurtogal noqon. Midaan waxay sitoos ah uga faa’iidaa fayo qabkooda iyada oo la yareynayo dareemaha kali ahaanshaha iyo iskarantiil, gaar ahaan dadka dhawaan imaaday.

Markii xiriirada intarneet-ka ay halaabaan, waxaa jiro saameyn xun oo fayo qabkooda shaqsiga haddii kooxdaan ay lumiso xiriirka qoyskooda dibada ee ku saabsan xaaladooda. Carqalada NZ ayaa sabab u noqon karto xadeynta xogta ee la gaaray ama tagitaanka intarneetka. Wadankooda asalka ah, kaabayaalka shabakada ama intarneetka waxaa carqaladeyn karo dhacdooyinka bulshada-siyaasada ama qarashaadka intartneetka qaaliga ah.

> "Waxaan leeyahay waaladiinteyda, walaalkeyga iyo 2 walaasha ee wadanka sidoo kale. Nasiib daro, kuma jiraan xaalad wanaagsan sababtoo ah waxaa jiro dagaal ka socdo gobolkaas. Waa mid murugo ah in laga fakaro. Aad ayay u adagtahay sababtoo ah shabakada ayaa hoos u sii socoto. Marka si toos ah ayaan u wacaa. Waxaan isticmaalaa barnaamij ka duwan ee aan ku waco, sababtoo ah adeegyada caadiga ah ma shaqeynayo ama igu xir. Haa, marka waxaan hadeer gashtay app-ka. Waxaan ku dalacnaa oo si toos ah ayaan u wacnaa haddii ay midaas shaqeyso. Iyo haddeer ma shaqeynayo."
>
> — Ka qeybqaataha cilmi baarista



# 3. Gabagabada iyo tallooyinka

Waxa ugu badan kooxdaan, ma jiraan hormar badan ee ku darista dhijitaalkooda markii la barbardhigayo 3 bilood ee koowaad iyo 3 sannadka koowaad ee muddooyinka dejinta. Si kastaba, waxaa jiro dareenka hormarinta ku darista dhijitaalka oo kuwa dago NZ oo waqti aad u dheer — tusaale ahaan, wax ka badan 10 sanno.

Midaan waxay abuurtaa fursada loogu dabaaldagayo safarka ku darista dhijitaalka kooxdaan iyada oo la sheegayo helitaanka iyo qeybaha xirfadaha hore ee ku jiro safarkooda dejinta.

Shabakadaha bulshada sida iskaa wax u qabsade, shaqaalaha dejinta, xubnaha bulshada iyo qoyska ayaa ah illaha loogu aaminsanyahay, oo ay xigto kanaalada iyo websaydyada dowlada rasmiga ah. Sidaas darteed, shabakooyinkaan waa in si dheeraad ah loo adeegsadaa, iyo janaalada iyo websaydyada waa in loo naqshadeeyaa si loo dhanyahay si ay uga caawiso hormarinta ku darista dhijitaalka kooxdaan.

Tallooyinka hoose waxay ku saleysanyihiin natiijooyinka cilmi baarista, ama ahan tallooyinka xeerka dowlada.

## Fursadaha lagu xalinayo arimaha helitaanka

Si ay uga caawiso xalinta arimaha helitaanka, tallaabooyinka kugu caawin karo bixin ku daris:

- aaladaha sida laabtoobyada illaa dooqyada dhaqaalaha kala duwan iyo xiriirada intarneetka meeshaas oo loo qiimeeyay sida qaab waxtar ah. Barnaamijka Helitaanka dhijitaalka ah ee loo siman yahay ee Wasaaradda Waxbarashada waa tusaalaha qaab lagu guuleystay
- xogta lagu qiimeeyay ebar ee lagu galayo adeegyada onleenka ugu muhiimsan oo ay ku jiraan adeegyada muhiimka ah ee dowliga iyo aan dowliga aheyn
- boosaska bulshada sida maktabadaha dadweynaha iyo goobaha diimeedka meeshaas oo xirfadaha tababarka dhijitaalka iyo saldhigyada aaladaha laga geli karo.

## Fursadaha lagu xalinayo arimaha xirfadaha

Si ay uga caawiso xalinta arimaha xirfadaha, tallaabooyinka kugu caawin karo bixin ku daris:

- tababarka xirfadaha dhijitaalka ee luuqadaha anshaxa iyada oo loo marayo dhaxdhexaadiyayaal la aaminsanyahay ee lagu yareynayo waqtiga kooxdaan ahaaneyso in dhijitaal ahaan laga reebo
- taageerada la bartilmaameedsaday iyo guud ee dumarka ku jiro bulshooyinka qowmiyada, gaar ahaan agagaarka waajibaadyada daryeelsiinta qoyska si markaas ay uga qeybgalaan fasalada tababarka

- tababarka xirfadaha dhijitaalka oo leh heerarka guusha cad si markaas ay wax ku ool u ahaato iyo xoojin, tusaale ahaan, xirfadaha tababarka dhijitaalka gaarka ah ee mobeelka casriga sida barta bilowga ka hor intaadan u sii socon tababarka xirfadaha dhijitaalka adag ee aaladaha weyn sida labtobyada
- diirada saaro tababarka aagaga 3 xirfadaha dhijitaalka ugu sareeyo ee loo aqoonsaday sida inay muhiim u tahay kooxdaan: xirfadaha wareejinta onleenka, badqabka onleenka iyo xirfadaha amniga, iyo xirfadaha lagu qaabilayo warbixinta iyo tusmada onleenka. Tan waxaa ku jiri karto tababarka lagu helayo adeegyada ugu muhiimsan onleenka sida MyMSD, myIR, koontada socdaalka onleenka iyo bangiga onleenka.

## Tixgelinada kale

Si aad ugu caawisid kordhinta ku darista dhijitaalka dagida ee qaxootiga hore iyo soo galootiga la takooro ee NZ, tixgeli:

- sii wad inaad mudnaan siisid tababarka aqoonta luuqada Ingiriiska
- ku diyaarinta illaha luuqadaha qowmiyada onleenka ah, gaar ahaan adeegyada ugu muhiimsan
- ka dhigida tababarka ku darista dhijitaalka qeyb ka mid ah barnaamijka dib u dejinta oo qaxootigii hore iyo soo galootiga la takooro ESL
- maalgashi badan oo lagu kordhinayo taageerada ku darista dhijitaalka ah oo sannooyinka 3 to 5 koowaad ee dajinta
- isticmaalida waxbarashada Waqtiga dheer si aad u fahamtid saameynta taageerada ku darista dhijitaalka xiliga hore oo natiijooyinka dajinta
- cabirida iyo dabagelida booska ku darista dhijitaalka ee kooxdaan oo marka laga eego dagistooda iyo natiijooyinka dagista ee NZ.

> "Waxaan ka imaaday dibada, waxaad ibartay af Ingiriis, oo waan bartay luuqadaan, oo halkaan ayaan ka shaqeeyaa, waxaan bixiyaa canshuur, waxaan caawiyaa dowlada. Marka ma noqonayo mid aan waxtar laheyn, waxaan noqonayaa mid waxtar leh.
>
> Markii aad i bartid xisaab iyo Ingiriis, aad ayaan waxtar u yeelanayaa. Waan sameeyn karaa wax ka weyn abid.
>
> Markii aad i bartid kumbuyuutaro, marka waxaan leeyahay aasaasyada IT, Ingiriiska iyo xisaabta. Waxaan ahaanayaa taqasus mustaqbalka oo waxaan ka caawinayaa New Zealand inay dhaqso iyo dhaqsi kobacdo."
>
> — Ka qeybqaataha cilmi baarista



# 4. Rixraacyada

Belong Aotearoa, UMMA Trust, RASNZ, NZ Red Cross, Asylum Seekers Support Trust, Aotearoa Resettled Community Coalition, and Family Action. (2020). 'Understanding social work provision to former refugees and marginalised migrant communities in Auckland.' (PDF, 1.650 MB). https://static1.squarespace.com/static/5cca54599e483d0001fff53b/t/5f10c712d863ea7a41fc368a/1594935071412/Social+Work+Research+Report+FINAL_2020.pdf

Department of Internal Affairs. (2019, Maajo). 'Digital inclusion stocktake: What digital inclusion looks like across government.' https://www.digital.govt.nz/dmsdocument/155-digital-inclusion-stocktake-what-digital-inclusion-looks-like-across-government/html#executive-summary

Digital Inclusion Research Group. (2017, Maajo). 'Digital New Zealanders: The Pulse of our Nation.' MBIE and DIA. https://www.mbie.govt.nz/dmsdocument/3228-digital-new-zealanders-the-pulse-of-our-nation-pdf

UN General Assembly. (2016, Oktoobar 3). 'New York Declaration for Refugees and Migrants: resolution / adopted by the General Assembly.' Refworld. https://www.refworld.org/docid/57ceb74a4.html

UNHCR. (2018, Agoosto 31). 'Refugees' and 'Migrants'— Frequently Asked Questions (FAQs).' Refworld. https://www.refworld.org/docid/56e81c0d4.html



digital.govt.nz